



Español (503) 916-3582 | Tiếng Việt (503) 916-3584 | 中文 (503) 916-3585 | Русский (503) 916-3583 | Soomaaliga (503) 916-3586

## **Waxaa Loo Magacaabay Ku-Xigeenka Guddoomiyaha Waxbarashada ee Bulshooyinka Dugsiyada iyo Waxbarashada, Dr. Cheryl Proctor.**

**Janaayo 2022**

Waxaa farxad ii ah inaan ku dhawaaqo magacaabista Dr. Cheryl Proctor inay noqoto Guddoomiye-xigeenka Bulshooyinka Dugsiyada iyo Waxbarashada. Dr. Proctor waxay leedahay aqoontii, waayo-aragnimo aan la soo koobin karin, iyo iyada oo muujisay xirfadaha loo addeegsado si ay karti ku jirto doorka hoggaamineed ee lagama maarmaanka ah .

Ilaa iyo intii ay ku soo biirtay Dugsiyada Dadweynaha Portland (PPS), Dr. Proctor, doorkeedii Madaxa Sarre ee Waxbarashada, waxay hoggaanka u haysay dhowr qeybood oo muhiim ah hoggaamintooda. Kuwasi waxaa ka mid ah dib u habeynta Xafiiska Barashada iyo Barista sidii uu si hufan oo leh istaraatiijiyada fiican u taageri lahaa horumarinta waxbarashada dugsiyada degmada oo dhan, daahfurida habraacyada qabatiminida manhajka socda, horumarinta nidaaminta qaabka waxbarashada, iyo dib u toosinta isticmaalka agabyada si loo gaadho himilooyinka lagu tilmaamay qorshaha istaraatiijiyada dugsiyada degmada ee, [Horaa Loo Soconayaa Si Wada Jir ah](#). Shaqadani waxaa saadaaliyey hoggaaminta xafiiskeeda iyada oo loo marayo qiimeyntii hore iyo barnaamijyadii hadda iyo habka waxbarashada PPS u qaadato. Hoggaaminteedu sidoo kale waxay udub-dhexaad u ahayd taageerida dugsiyada sidoo wax looga qaban lahaa caqabadaha uu keenay xanuunkani faafaya.



Waayo-aragnimada Dr. Proctor waxaa ka mid ah xilalka hoggaamineed ee ay ka soo qabatay labo dugsiyo degmo oo ku yaala magaalooyinka waaweyn kaalin hoggaamineed. Waxay u soo addeegtay ardayda iyo qoysaska iyada oo noqotay Kaaliyaha Guddoomiyaha Waxbarashada Dugsiyada Degmada Philadelphia, halkaasi oo ay taageero siinaysay maamulayaasha dugsiyada sarre sidii ay u horumarin lahayeen waxbarashada iyada oo la horumarinayo waxbarashada. Markii ugu horeysay waxay ku soo biirtay sanadkii 2016 Xafiiskooda Xarunta Dhexe iyada oo qabatay xilka Agaasimaha Guud ee Qorsheynta Horumatinta Dugsiyada iyo Taageerida Xafiiska oo ku Salaysan Caddeymaha la hayo, hoggaaminta iyo hagista hoggaamiyaasha dugsiyada sidii ay u qorsheyn lahaayeen iyo meelmarinta barnaamijyada ku wajahan sidii kor loogu qaadi lahaa guusha ardayda, gaar ahaan ardayda madowga u badan ee Philadelphia. Ka hor intii ayna ka soo shaqeyn Philadelphia Dr. Proctor waxay ka soo



Español (503) 916-3582 | Tiếng Việt (503) 916-3584 | 中文 (503) 916-3585 | Русский (503) 916-3583 | Soomaaliga (503) 916-3586

shaqaysay muddo 17 sanno ah Dugsiyada Dadweynaha Broward ee (Gobolka Florida), halkaasi oo ka soo qabatay xilal hoggaamineed in ka badan 10 sanno. Dr. Proctor shaqadeeda waxbarashada waxa ay ka bilowday barre waxbarashada gaarka ah, khabiir ku takhasusay waxbarashada ardaya qayrul-caadiga ah, iyo khabiir dhinaca akhriska ah. Korodhkeedii xirfadaha hoggaaminta iyo khabiirnimada manhajka, Dr. Proctor waxaa loo dalaciyeey inay noqoto maamule-xigeen iyada oo ka dibna noqotay maamule.

Dr. Proctor waxay mar walba aaminsan tahay inay “macallimiintu yihiin wadnaha barashada, iyada oo maamulayaashu abuurayaan jawiyo nabadgelyo oo wax lagu barto haddii ay yihiin macallimiinta iyo ardayda koritaankooda.”

Iyada oo hanatay waxbarasho dhammeystiran, waxay qaadatay shahaadadda koowaad dhinaca Xiriirka Sayniska, iyada oo ku takhasuskeedii ku lammaanaa ahaa Xayeysiinta, waxayna ka qaadatay Machadka Teknoolajiyada New York; Shahaadadda Labaad waxay ku qaadatay Sayniska Waxbarashada Gaarka ah, iyada oo ay ku lammaanaa Akhriska, waxayna ka qaadatay Jaamacada Caalamiga ee Florida; ugu dambeyn waxay Shahaadadda ugu dambaysay PhD ku qaadatay Hababka Cilmi Baarista Loo sameeyo iyo Hoggaaminta Waxbarashada, waxaana ku lammaanaa Siyaasada Waxbarashada, waxayna ka qaadatay Jaamacada Atlantic Florida.

Waxaa Sharaf ii ah inaan ku soo dhaweeyo Dr. Cheryl Proctor inay noqotay xubin cusub oo ka mid ah kooxda hoggaanka dugsiyada degmada. Waxaan ku kalsoonahay inay inala wadaagi doontaa inay si hagar la'aana u taageerto bulshooyinka dugsiyadeena, rajooyinka waaweyn ee laga filayo sidii loo dardar galin lahaa iyo kor u qaadista natiijooyinka ardayda, iyo yoolka sidii horumar cad loo qaado dhinaca [aragtida](#) nidaamka ugsiyadeena.

Guadalupe Guerrero  
Guddoomiyaha Waxbarashada